

**GUDDIGA MAAMULKA DEGAANKA MULTNOMAH  
ISKU DIIWAAN GELINTA WARBIXINTA BULSHADA**

---

**Fadlan foomkan buuxi una soo celi Karaaniga Guddigu leedahay  
\*\*\*Foomkani waa diiwaanka bulshada\*\*\***

**TAARIKHDA KULANKA:** \_\_\_\_\_

**MAWDUUCA:** Dhageysiga Dadweynaha

**MAWDUUCA GAARKA AH EE MIISAANIYADDA (WAAXDA AMA BARNAMIJKA):** \_\_\_\_\_

**MAGACA (DAABAC & WAXAAD RAACISAA SIDA LOOGU DHAWAAQO):** \_\_\_\_\_

**CINWAANKA:** \_\_\_\_\_

**MAGAALADA/GOBOLKA/ZIP-KA:** \_\_\_\_\_

**TELEFOONKA: MAALINTII:** \_\_\_\_\_ **GALABTII:** \_\_\_\_\_

**EMAIL-KA:** \_\_\_\_\_ **FAX-KA:** \_\_\_\_\_

**HADDII AAD DOONAYSO IN AAD SI SHAKHSI AHAANA GUDDIGA WAX UGU SHEEGTO:**

1. Fadlan foomkan buuxi una gudbi Karaaniga Guddigu leedahay.
2. Dadka fikradaha dhiibanaya waxaa loogu wacaa hadba sida foomamku iskugu xigaan si ay warbixinta u dhiibtaan. Sargaalka Kulanka Guddoominaya ayaa laga yaabaa in uu waxka beddel ku sameeyo habka warbixintu iskugu xigto ee loo dhiibanayo ama Dadka la Martiqaaday ama Madaxda la soo Doortay ka codsado in ay marka hore hadlaan.
3. Marka magacaaga loo waco, halka hore kaalay oo fariiso miiska loogu tala galay xiriiriyaha; macagaaga tilmaan si loo ogaado si cad oo la maqli karaana ugu hadal cod baahiyaha.
4. Fikradda ay dhiibanayso bulshadu waxaa lagu soo koobay **3 daqiiqo ama in ka yar** qofkiiba iyadoo wax kale uu soo jeediyo Guddoomiyuhu maahane, kaasi oo ah Sargaalka Kulanka Guddoominaya.
5. Dhawaaq aad maqasho ayaa tilmaami doona dhammaadka wakhtigii lagu qoondeeyay.
6. Haddii aad gudbinayso qoraalo si loo siiyo Guddiga, toddaba (7) nuqul ayaa loo baahan yahay. Haddii kaliya hal (1) nuqul la bixiyo, waxaa la gelin doonaa diiwaanka iyadoo kulanka ka dibna hab elektaroonig ah loola wadaagi doono Guddiga iyo Qareenka Degaanka.
7. Dhammaan kulanada waxaa la duubay iyagoo maqal iyo muuqaal ah waxaa laga arki karaa: [multco.us](http://multco.us).
8. Guddoomiyuhu wuxuu leeyahay awoodda lagu illaalinayo kala dambaynta waxaana suuragal ah in uu soo rogo xaddidaado lagama maarmaan u ah in kulanku si wax ku ool ah oo habsami leh u socdo. Qof kasta oo ku guuldaraysta in uu raaco Xeerarka Anshaxa, ama abuura khalkhal, waxaa suuragal ah in laga codsado ama looga baahdo in uu meesha ka tago iyadoo haddii uu ku guuldaraysto in uu sidaasi yeelana, uu noqonayo qof aan meel loo ogolayn ku soo xadgudbay iyadoo loola dhaqmi doono hadba sida ku habboon.

**HADDII AAD DOONAYSO IN AAD GUDBISO QORAAL HALKII AAD KA DHIIBAN LAHAYN FIDRAD  
DHANKA AFKA AH OO KU AADAN GUDDIGA:**

1. Fadlan foomkan buuxi oo soo raaci warbixintaada oo qoraal ah una soo celi Karaaniga Guddigu leedahay ee kulanka jooga, ama email ugu dir: [lynda.grow@multco.us](mailto:lynda.grow@multco.us)
2. Warbixinta qoraalka ah waxaa la gelin doonaa diiwaanka rasmiga ah.